SIDEE AYEEY MAGAALADA U WEYNAATAA

Qorsheynta Magaalada Toronto

Magaalooyinka waa meelaha dadka eey ku noolaadaan, waxbartaan, shaqeeyaan, booqdaan kuna ciyaaraan. Waa ineey bixiyaan adeegyo balaaran – haddii aan in yar ka magacowno waa dugsiyo, beero-nasasho, daryeel caafimaad, dukaamo, maqaayado iyo gaadiid. Magaalooyinka dadka soo jiidanaya oo nolosha ka muuqato waa kuwa deganayaasha, martida iyo ganacsiyadaba ee doonayaan ineey joogaan.

Toronto, Qeybta Qorsheynta Magaalada waxay ka caawisaa ineey hagto magaalada habka eey u eg tahay iyo sida eey u weynaaneyso. Qorsheynta Magaalada waxay la shaqeysaa beesha iyo qeybaha kale si eey u sameyso hadafyada iyo nadaamyada loogu talagalay horumarinta, iyadoo maskaxda ku heysa welwelada muhiimka ah ee bulsho, dhaqaale iyo deegaan.

Qorsheyn wanaagsan waxay nagu hogaamisaa koritaan nadaamsan waxayna naga caawisaa nooca beesha aan dooneyno inaan noqono.

Waa maxay doorka qorsheeyaha?

Si eey u sameeyaan dibna ugu eegaan qorshooyin, nadaamyo iyo mashaariic ilaaliya oo hagaajiya deegaanka magaalada, shaqaalaha qorsheynta waxay soo ururiyaan arrimaha fikradaha dadweynaha iyo daraasadaha. Waxay siiyaan Golaha Magaalada kaalmo iyo talo iyo sidoo kale soo-jeedino. Qorsheeyayaasha waxay sidoo kale si dhow ula shaqeeyaan beesha iyo kooxaha magaalada oo dhan ah si eey uga caawiyaan ineey gaaraan ujeeddooyinkooda ah magaalo ka hagaagsan.

Qeybta Qorsheynta Magaalada Toronto waxaa loo habeeyey degmo ahaan - Etobicoke York, North York, Toronto & East York and Scarborough – afar qeybood oo howlgaleed:

1. Qorsheynta Bulshada – waxay kala taliyaan Golaha mashaariicda horumarinta ka dib markii eey la tashadaan xubnaha dadweynaha iyo adeegyada Magaalada, iyo ka dib markii eey dulmaraan oo abla-ableeyaan dhamaan qeybaha mashruuca horumarinta.

2. Cilmi-baaris iyo Nadaam – waxay sameeyaan nadaam qorsheyn oo ku saleysan cilmi-baaris balaaran oo ah isticmaalka dhulka, guriyeynta, adeegyada beesha iyo deegaanka. Waxay maamulaan oo horumariyaan mashaariicda iyo barnaamijyada dhowridda hiddaha.

3. Hindise Magaalo – horumariyaan hindise tayo sare leh oo loogu talagalay jidadkeena, beeraheena nasashada iyo meelaha banaan. Waxay hagtaa sida dhismayaasha ku yaala dhul gaar ah loo qaabeynayo, qabanqaabinayo loona meeleynayo.

4. Gaadiidka – waxay ku shaqo leedahay hagaajinta gaadiidka, niyadjabinta dadka ee ku xirnaanta baabuurta iyo dhiirigalinta noocyo gaadiid oo bedel noqon kara sida socod, baaskiil, subweeyo iyo tareenada dusha (streetcars).

Qorsheynta Ontario

Qorsheeyayaasha Magaalada Toronto waxaa haga sharciyo, xeerar, xeer-hoosaadyo qeybin-dhuleed iyo nadaamyo dhowr ah:

Xeerka Qorsheynta

- Wuxuu xukumaa qorsheynta Ontario oo dhan
- Wuxuu ka doonayaa dowladda hoose ineey lahaato qorshe rasmi ah
- Wuxuu sameeyaa hab ansixineed oo loogu talagalay horumarinta dhulka iyo la-tashiga ugu yar ee dadweynaha looga baahan yahay
- Wuxuu sameeyaa xaq-u-lahaansho rafcaaneed ee Guddoonka Dowladaha-hoose Ontario

Ooraahda Nadaam Goboleedka (PPS)

- Wuxuu siiyaa jaho nadaam oo ah arrimaha qorsheynta ee gobolka, tusaale, deegaanka, dhaqaalaha iyo arrimaha guriyeynta
- Go'aanada qorsheynta waa ineey "islahaadaan" PPS-ta

Xeer-hoosaadyada Dhul-qeybinta

- Wuxuu howlgeliyaa Qorshaha Rasmiga ah iyadoo lagu saleynayo "aag gaar ah"
- Xeer u sameynta isticmaalka dhulka iyo dhisidda dhismayaasha
- Qeexeysaa waxa laga dhisi karo dhulka hantida ah, aan niraahno:
  - waxa loo ogolaaday in loo isticmaalo aagga
  - cufka dhismaha
  - dhererka dhismaha iyo khasaarahiisa
  - shuruudaha meelaha gawaarida la dhigto iyo meelaha banaan

Guddiga Isku-hagaajinta

• Guddiyo degmeed oo eey magacaabeen Golaha Magaalada ayaa awood loo siiyey ineey dhegeystaan oo go'aano ka gaaraan arrimaha qorsheynta ee yar-yar sida:
  - isbedelada yar-yar ee Xeerhoosaadka Qeybinta-dhulka;
  - codsiyada sharciga ah ee la-raaceyn; iyo
  - codsiyada ogolaanshaha in la qeybiyo dhulka.

• Go'aanada oo dhan waxaa rafcaan looga qaadan karaa Guddoonka Dowladaha-hoose ee Ontario.

www.toronto.ca/planning/comm_adj.htm

Guddoonka Dowladaha-hoose ee Ontario (OMB)

• Guddoon rafcaan oo gobolka magacaabay ee hantida iyo arrimaha qorsheynta
• Wuxuu dhageystaa go'aamada Golaha ee codsiyada dhisidda.
• Wuxuu kaloo dhageystaa Go'aamada Guddiga Isku-hagaajinta
• Codsadayaasha waxay kaloo rafcaan uga qaadan karaan fashilaadda Magaalada ee ah waqtigii sharciga ogolaa.

www.toronto.ca/torontoplan

Sideed Ugu Howlanaan Kartaa

Waxaad noqon kartaa qeyb ka mid ah habka qorsheynta adoo la soconaya waxa ka dhacaya beeshaada iyo adoo ka qeybgalaya shirarka dadweynaha. Ka qeybgalkaaga, wuxuu magaalada awood u siinayaa ineey gaarto go'aamo wanaagsan oo saameynaya mustaqbalkaaga iyo xaafaddaada.

Haddii aad daneyneyso dhamaan ama qeyb ka mid ah qorsheynta la soo jeediyey iyo isbedelka nadaamka, waa inaad:
If you are interested in all or part of a planning proposal or policy change, you should:

- ogaataa dhamaan inta aad ka ogaan kartid arrinta oo aad ka fikirtaa sida eey kuu saameyn doonto;
- ka qeybgashaa shirarka dadweynaha iyo fadhiyada wararka si codkaaga loo maqlo;
- U qor xubintaada Golaha aragtidaada waxa eey tahay;
- la xiriir Qorsheeyayaasha Magaalada; iyo
- ka qeybgal doorashooyinka dowladaha hoose.